

Minnesota Traffic Safety Camera Citation

Sharciga Minnesota Qeybtiisa 169.147 waxa uu maamulka magaaloooyinka u ogolaanayaa in ay ka qeyb qaadan karaan Nidaamka Amaanka ee Kaamarooyinka. Sida uu dhigayo sharcigaas, Maamulaha Waaxda Gaadiidka, oo la kaashanaya Maamulaha Amaanka Dadweynaha, waa in ay abuuraa nidaamka tijaabada ah ee kaamarooyinka oo waxbarasho iyo dhaqan gelin loogu fidiyo dadka jabiya sharciyada xawaaraha gaadiidka (Sharciga Minn. § 169.14, qeyb hoosaadka. 13), Jabinta sharciyada nalalka gaadiidka kalahaga (Minn. Stat. § 169.06, qeyb hoosaadka. 10), ama labadaba oo lagu xiriiryo nidaamka amaanka kaamarooyinka. Muuqaalka ka muuqda boggan waxa uu cadeyn u yahay jabinta sharciga ee mid ka mid ah Sharciga Minn. § 169.14, qeyb hoosaadka. 13, 169.06 qeyb hoosaadka. 10.

Mulkiilaha ama kireystaha gaadiidka lama ganaaxayo sida uu dhigayo qeybta 169.06, qeyb hoosaadkiisa 10 haddii:

- 1) Gaariga oo la xaday waqtiga sharciga la jabiyeey;
- 2) Mulkiyadda gaariga oo la wareejiyey sida waafaqsan sharciga 168A.10 oo la sameeyey ka hor xilliga jabinta sharciga,
- 3) mulkiilaha gaariga waa kireeye gaariga, kireeyaha ayaa cadeeyey magaca iyo cinwaanka kireystaha;
- 4) Gaarigu inuu yahay kuwa gargaarka degdegga ah oo hawshiisa gudanaya xilliga sharciga la jabiyeey;
- 5) qof kale ayaa dambiga lagu helay, sida uu dhigayo sharciga 171.01, qeyb hoosaadkiisa 29, isla jabintaas sharciga,
- 6) Mulkiilaha gaariga ayaa maxkamadda ama xeer ilaalinta u soo qoraya hadal uu ku dhaaranayo in mulkiilaha gaariga uusan wadin gaariga xilliga sharciga la jabiyeey.
- 7) Mulkiilaha gaariga ayaa maxkamadda ama xeer ilaalinta u soo qoraya hadal uu ku dhaaranayo in mulkiilaha gaariga inuu wadayey gaariga xilliga sharciga la jabiyeey iyada oo ay jirtay xaalad caafimaad oo degdeg ah oo wadaha ama rakaabka gaariga; ama
- 8) Mulkiilaha ama kireeyaha gaariga aya tigid lagu siiyey sidaas oo kale.

Marka laga reebo marka sharci jabintu tahay gaadiidka ganacsiga, ama jabinta sharciga uu geystay qof heysta leesinka gawaarida xamuulka ee A, B, ama C ee leesinka gawaarida xamuulka ama kan ku meel gaarka ah:

Marka ugu horeysa oo qofku sharciga jabiyo waa in la siiyaa digniin oo dusha ganaax lagama saarayo. Marka labaad ee qofku sharciga jabiyo waxaa loo dirayaa fasal uu qaato ee tababarka amaanka waddida gaadiidka sida uu dhigayo sharciga 169.174 qeyb hoosaadkiisa 11. Qof loo diro fasalka oo dhameystira tababarka ganaax lagama qaaday mana loo galinayo diiwaanka.

Haddii diiwaanka loo geliyo, gelintaas sabab uma noqon karta in laga qaado leesinka ama laga joojiyo waddida gaadiidka.

Marka laga reebo marka sharci jabintu tahay gaadiidka ganacsiga, ama jabinta sharciga uu geystay qof heysta leesinka gawaarida xamuulka ee A, B, ama C ee leesinka gawaarida xamuulka ama kan ku meel gaarka ah adeegsiga.

MACLUUMAAD DHEERAAD AH: Dhamaan ama qeyb ahaan kharashka maxkamadda ayaa laga deynayaa haddii qofku ceyr yahay ama ay jirto xaalad dhaqaale oo qoyskiisa la soo deristay. Waxaa suurogal ah in aad codsan karto dhageysi maxkamadeed adiga oo soo waca Xarunta Bixinta Tigdhada ee Minnesota (CPC) si aad u codsato in lacagta lagaa daayo haddii aadan awoodin biixinta lacagta. Telefoonka dadka degan agagaarka magaaloooyinka mataanaha (612, 651, 763, 952) ama telefoon caalami ah waxa ay soo wici karaan 651-281-3219; dhamaan dadka kale 1-800-657-3611. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah soo wac (CPC) ama soo booqo visit www.mncourts.gov/fines.

FADLAN AKHRI WARQADDA MACLUUMAADKA EE LAGU SIIYEEY EE TIKIDKAN KAASOO AAD KA HELEYSO MACLUUMAAD DHEERAAD AH SIDA TIKIDKA LOOGA JAWAABO AMA LOOGA HOR YIMAADO

Waxaa laga yaabaa in ay qaadatao ilaa 7 maalmood in tigidka kombiyuutarka la galiyo oo CPC ku caawin karaan ama aad ka bixin karto barta internetka.

Soo booqo www.mncourts.gov/fines si aad u ogaato haddii aad bixin kartotigidkaaga adiga oo aan maxkamad tagin, inta la doonayo in aad bixiso, sida loo qabsado balanta maxkamadda, sida lacagta tartiib loo bixiyo, iyo macluumaad dheeraad ah.

SI AAD U BIXISO TIKIDKA, raac talaabooyinka soo socda:

- Barta internetka:** Soo booqo www.mncourts.gov/fines. Diyaarso tigidkaaga ama lambarka dacwadda haddii aad heli karto. Lacag dheeraad ah ayaa raaceysa.
- Telefoonka:** Soo wac CPC. Diyaarso tigidkaaga ama lambarka dacwadda haddii aad heli karto. Lacag dheeraad ah ayaa raaceysa.
- Boostada:** Jeeg ama jeegga lacagta (money order) ku qoran magaca maxkamadda (Court Administration, Minnesota Court Payment Center, P.O. Box 898, Willmar, MN 56201. Soo raaci sawirka tigidka ama ku qor dhabarka jeegga lambarka tigidka ama jeegga lacagta.
- Fool ka fool:** Waxa aad ka bixin kartaa daaqadda maxkamadda magaca degmada ku qoran tigidka. Cinwaanka maxkamadda waxa aad ka heli kartaa www.mncourts.gov/Find-Courts.aspx.

WAXA AAD XAQ U LEEDAHAY IN AAD BALAN MAXKAMAD QABSATO.

Waa in aad bixisaa lacagta lagugu leeyahay AMA aad balan qabsataa balan maxkamadeed 30 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda maxkamadda laga diiwaan geliyo tigidka. Macluumaad dheeraad ah ee sida lagu bixiyo lacagta, ama macluumaadka kale ee muhiimka ah, soo wac CPC ee lambarka kor ku xusan ama soo booqo www.mncourts.gov/fines.

Haddii aad bixiso ganaaxa, waxa ay ka dhigan tahay in aad qiratay, dambiga lagugu soo eedeeyey oo aad ka tanaasushay xuquuqda aad xaq u leedahay ee hoos ku xusan: (Sharciga Minnesota ee Fal Dambiyeedka P. 23.03)

1. Dhageysiga maxkamadda, haddii uu yahay dambi hoose, ama makamad ama xeerbeegti ee dhamaan dambiyadaa dhan;
2. Waxa aad xaq u leedahay in qareen ku matalo;
3. In lagu aqoonsado in aadan dambiile aheyn ilaa lagugu caddeeyo oo lagugu helo;
4. In lagu horkeeno oo aad su'aalo weydiin karto dhamaan markaatiyaasha; iyo
5. In aad xaq u leedahay in aad iska aamusnaato ama aad ka markaati furto.

HADDII AAD BIXIN WEYSO LACAGTA AMA AAD KA MAQNAATO MAXKAMADDA:

- Lacag dheeraad ah oo daahidda ah ayaa dusha lagaa saarayaa.
- Ka maqnaashaha maxkamadda waxaa loo tixgelinayaa qirasho oo kale iyo** in aad ka hartay waxyaabaha aad xaq u laheyd oo ay ka mid tahay in dambiga lagugu cadeeyo, ilaa maxkamadda hor timaado muddo 10 cisho gudahood ah ee taariikhda aad lacagta ku bixin weysay ama aad ka maqnaatay maxkamadda oo ay ugu wacan tahay sababo aadan wax ka qaban karin. (Sharciga Minnesota § 169.91; 609.491; Sharciga Minnesota ee Fal Dambiyeedka 23.04-23.05)
- Waxaa suurogal ah in xarig lagu soo jaro.**

Haddii aadan heysan dhalashada Mareykanka, qirashada aad dambiga qirato waxa ay keeni kartaa in waddanka lagaa saaro, lagu diido in aad soo gasho Mareykanka, ama lagu diido shahaadada dhalashada Mareykanka. Sharciga Minnesota ee Fal Dambiyeedka P. 15.02, qeyb hoosaadka 1(3).

Qirashada dambiga waxa ay keeni kartaa in diiwaanka lagu geliyo.

Waaxda Amaanka dadweynaha ayaa laga yaabaa in la wargeliyo in aadan bixin lacagta ama aad ka maqneyd maxkamadda, ama diiwaanka lagu geliyey, taasoo keeni karta in waddida lagaa joojiyo, taasoo ku xiran xaaladdadacwadaada.

Iyada oo ku xiran xaaladda dacwadaada, sida uu dhigayo Sharciga Minnesota. § 480.15, qeyb hoosaadka. 10c, lacagta ganaaxa ah ee aan la bixin waxaa laga yaabaa in loo diro goobaha lacagaha soo ururiya. Waxa aad xaq u leedahay in aad ka hortimaado in lagu diro lacag soo ururiyaashav oo sabab looga dhigo bixin la'aan.

Maxkamadda oo la siiyo jeeg aan lacag ku jirin waa dambi, waxaa suurogal ah in ganaax ama fal dambiyeed dusha lagaa saaro. Waxaa intaas dheer, kharash ilaa \$30 ayaa laga yaabaa in disha lagaa saaro jeegagga soo noqda (Sharciga Minnesota § 604.113, qeyb hoosaadka. 2)